

## Dulqaadarada diimeed

### Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta, xanaaneeyayaasha iyo ardayda

#### Waxaa naga go' an

Wasaaradu waxay aqoonsatay, qiimaha iyo xushmada dhaqan, luuqadeed, diimeed iyo kala duwanaanta waxay rumeysan yihiin ardayd, bulshada dugsiga iyo qoysaskooda. Waxaa naga go'an baabi'inta dhammaan noocyada midab kala sooca dugsiyada dawlada ee NSW.

#### Waa maxay dulqaadarada diintu?

Dulqaadarada diintu waa marka qof uu yahay xaasid ah, cadaalad aan ahayn ama ula dhaqma dadka kale si ka duwan sababtoo ah diintooda, iimaankooda, waxay rumeysan yihiin ama dareenkooda diimeed.

#### Siday aradaydu u soo sheegi karto dulqaadarada diimeed

Ardayda la kulanta dulqaadarada diimeed waa inay u sheegaan macalinka ama xubin ka mid ah shaqaalaha dugsiga. Ardaydu waxay sidoo kale wici karaan ama iimeyl u soo diri karaan dugsigooda iyagoo isticmaalaya faahfaahinta xiriirka ee ku qoran website ka dugsiga.

Marmarka qaarkood dulqaadarada diimeed waxay leedahay qayb cunsuriyeed. Warbixinada cunsuriyada waxaa sameyn kara xubin kasta oo ka mid ah shaqaalaha dugsiga ama [Sarkaalka Xiriirka ka hortaga Cunsuriyada](#) (Anti-Racism Contact Officer) ee dugsiga. Wixii macluumaad dheeraad ah eeg [warbixinada cunsuriyada](#) (Reports of racism) iyo boggaga [qorshaha ka hortaga cunsuriyada](#) (Anti-racism policy).

#### Maxaa taageero ah oo ay helayaan ardaydu?

Ka markhaatinimada dulqaadarada diimeed ama soo arkideeda waxay ku yeelan kartaa ardayda saameyn togan. Macluumaad iyo adeegyada loogu talagalay ardayda waxaa laga helayaa website -dada soo socda:

- [Taageerada loogu taladalay caafimaadka Maskaxda ee ardayda](#) (Mental health support for students)
- [Boggoga uso xoog yeelashada ardayda](#) (Student anti-bullying pages)

## Siday xubnaha bulshada, xannaaneeyayaasha, waalidiinta u soo sheegi karaan u dulqaadarada diimeed

Waalidiinta, xannaaneeyayaasha iyo xubnaha bulshada waxay soo sheegi karaan dulqaadarada diimeed iyagoo ismetelaya ama metelaya arday iyagoo kalsoonidooda haysta.

Waa in loo sheegaa dugsiga meesha uu ka dhacay Shilka dulqaadarada diimeed. Waalidiinta iyo xannaaneeyayaashu qof ahaan ayey ku soo sheegi karaan, iimeyl ama taleefan adoo isticmaalaya faahfaahinta xiriirka ku qoran website ka dugsiga.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya markaad la xiriiraysid dugsiga, ka wac adeega turjumaanka taleefanka 131 450 oo u sheeg xiriiriyaha luuqadaad u baahan tahay iyo lambarka taleefanka aad rabtid inaad garaacdid. Adeegani waa bilaash.

### Maxaa taageero ah oo waalidka loogu tagalagay?

Taageero iyo macluumaad loogu talagalay waalidiinta ayaa laga helayaa website -yada soo socda:

- [Taageerada fayoaqabka iyo caafimaadka maskaxa](#) (Mental health and wellbeing support)
- [Maxaa taageero ah oo ay waalidiintu helayaan?](#) (What support is available to parents?)

### Tallaabooyin dheeraad ah

Wixii taageero dheeraad ah ama haddii aad rumeysan tahay in dulqaad daradu ay tahay wax nidaamka oo dhami leeyahay isticmaal Khadka taleefanka ee Udulqaad la'aanta Diimeed adoo wacaya 1300 679 332 oo u ogolaanaya xiriiriyaha inuu ogaado in wicitaanku uu ku saabsan yahay udulqaadashodarada diimeed. Isticmaal adeega turjumaanka haddii loo baahan yahay Khadka caawimaada wuxuu awoodaa:

- bixinta macluumaad ku saabsan nidaamyada iyo qorshayaasha la xiriira
- tixraac warbixinada goobaha khuseeya
- kula tali adeegyada taageera ku haboon
- raadi xallal cadaalad ah ee warbixinada.

### Si aad cabasho u sameysid

Ardayda, waalidiinta ama xannaaneenayaasha waxay samayn karaan cabasho iyagoo raacaya [tusaha tixraaca degdega ah ee sameynta cabashada](#) (quick reference guide for making a complaint) turjuman. Baro wax badan oo ku saabsan cabashooyinka ku yaal bogga turjuman [ee udoodayaasha iyo dadka taageerada ah](#) (support persons and advocates).

### Qorshayaasha wasaaradda ee la xiriira

- [Qorshaha ka hortaga cunsuriyada](#) (Anti-racism policy)
- [Qorshaha waxbarashada ee dhagamada badan](#) (Multicultural education policy)
- [Qorshaha dabeecada Ardayga](#) (Student behaviour policy)